

Baqasha lacagta –

Dadka waxaa soo jiita fal danbiyeedka



Waxaa caam noqotay in fal danbiyeedku soo jiito dhalintarta iyo dadka yaryar si ay lacago u koontarabaaniyaan marka hore laga heley fal danbi. Dadka waxaa lagu khiyaameeyaa, lagu soo jiitaa ama lagu khasbaa inay qaataan ama xawilaan lacago xisaabtooda ah oo marka danbe ay diraan. Taasi waxay ka dhigtaa baqasha lacagta.



Hore maad u taqaan:

- ◆ Baqasha lacagtu waa qof lacagta lagu heley fad danbi xawila. Markan oo kale xataa hadii qofka lacagta dirayaa aanu ogayn in fal danbi ay fuliyeen.
- ◆ In qofku noqdaa baqashada lacagta waxay khatar qofka u gelisaa inuu danbiile noqdo kuwaas oo ka qayb gala danbiyaha lasoo aabaabulay.
- ◆ Qofka xawilaya lacagta marka hore laga heley fal danbigu waxa lagu yeelan karaa inuu gudo lacagta dhamayska tiran, xataa hadii kaliya uu xawilay wax yar.
- ◆ Dadka masuulka ahi waxay ka masuul noqon karaan inay bixiyaan lacagta caruurta laga doonayo mararka uu ilmo yar oo da'dii aan gaadhini uu gacant la galo baqashada lacagta.
- ◆ In la noqdo baqashu waxay horseedaa fal danbiyada aadka u adag sida xabada ama mukhaadaraadka la koontorobaaniyo.

Xasuusnaw in:

- ◆ Masuul ahaan ilmo yar oo aan qaadhin, waxaad xaq u leedahay inaad eegto xisaabta bangiga ilmahaaga. Waxaad la socon kartaa waxa ilmuhu ku qabanayo lacagta iyo inaad ogaato wixii isticmaal lacageed oo shaki leh.
- ◆ Waxaa muhiim ah inaad la socoto waxa onlineka ka qabanayaan ilmaha ama dadka dhalinyarta ah ee kugu xeerani. Waydii su'aalaha sida: "maxaa maanta ka socday online ahaan?"
- ◆ Hadii aad ka shakido lacagta aad ku aragtay xisaabta ilmuhu inay la xidhiidhi karto lacag la koontorobaaninayo, bangiga la xidhiidh oo kadibna bilayska ogaysii.

Maxay ka dhigan tahay baqasha lacagtu?

Baqashada lacagtu waa qof lacagta kontobaaniya kaas oo u ogolaanayaa in xisaabtiisa bangiga loo isticmaalo oo kadibna ka caawina inuu lacagta ka saaro, ama xawilo oo marka hore ka timid fal danbi.

Dadka lacagta koontorobaaniyaa waxay mar kasta u xawilaan lacagta lagu heley fal danbi nidaamka xisaabta wareegta si ay ugu muuqato inay noqoto lacag lagu heley sharci. Koontorobaanistu waxay qaristaa meesha ay lacagta ka timid.